# Wadahadallo caafimaad oo loogu talagalay 50-jirrada jooga Skåne!



1177

REGION SKANE

Wadahadallo caafimaad oo loogu talagalay 50-jirrada jooga Skåne!



1177

REGION SKANE

# Oggolaw wadahadalka caafimaad ee rugtaada caafimaadka

**Caafimaadkaagu waa muhiim. Jimicsi joogto ah, cunto caafimaad leh, sigaar-iyo tubaako ka joogsasho iyo inaad taxaddir u lahaato isticmaalidda khamriga, waxaad ku yarayn kartaa halista cudurrada wadnaha iyo xididdada. Oggolaw wadahadalkaaga caafimaadka.**

## Adigaaga buuxinaya 50ka sano

- Wadahadalka caafimaadku waa lacag la'aan, wuxuuna qiyaastii qaadanayaa hal saac.
- Wadahadalka caafimaadku wuxuu ahaan karaa mid anfac leh iyadoon taas loo eegeyn inaad si buuxda u caafimaad qabto ama aad jirro qabto.
- Inta uu wadahadalku socdo, waxaa lagu siinayaa talo iyo taageero waafaqsan xaaladdaada nololeed. Isbeddello yaryar ayaa sameyn kara farqi weyn.
- Waxaad dooran kartaa inaad wadahadalka caafimaad goobta u timaado ama in fiidiyow laguugula yeesho.

## Sidan ayey wax u dhacayaan

1. Rugtaada caafimaadka ayaa ku soo wacaysa si aad u qabsato waqti kugu habboon. Fadlan gal bogga 1177 si aad u eegto in nambarka taleefankaagu uu sax yahay.
2. Marka aad oggolaato wadahadalka caafimaadka, waxaad farriin qof ahaaneed ku heli doontaa su'aalo ku saabsan caafimaadkaaga marka aad gasho 1177.se.
3. Waxaa rugta caafimaadka lagaaga qaadayaa dhiig baaritaan ugu dambeyn hal usbuuc ka hor wadahadalka caafimaadkaaga.
4. Waxaad wadahadalka caafimaadka la lahaaneysaa hoggaan wadahadal oo tababaran. Inta booqashada lagu guda jiro, waxaa la cabbirayaa cadaadiska dhiigga, miisaanka, dhererka iyo cabbirka dhexda. Waxaad guriga u qaadan doontaa xagal caafimaad oo qof ahaaneed.
5. Adiga naftirkaaga ayaa dooranaya haddii aad rabto talo iyo taageero aad isbeddel ku sameyso.

Adigaaga aqbala wadahadalka caafimaadka waxaad gacan ka geysaneysaa cilmibaaris ku aaddan caafimaadka bulshada adigoo ka qayb qaadanaya mashruuc cilmi baaris. Xog dheeri ah oo ku aaddan mashruuca cilmi-baarista waxaad la heleysaa su'aalaha ku saabsan wadahadalka caafimaadkaaga.

Iskaan-garey nambarka QR-ka ee 1177.se si aad u hesho xog dheeri ah oo ku saabsan wadahadalka caafimaadka.

*Macluumaadkaaga wadahadalka caafimaadka waxaa lagu qorayaa diiwaanka tayada ee gobolka Skåne ee wadahadalka caafimaadka. Sida xogta ku jirta diiwaanka loo isticmaalayo waxaa qoraya fasalka 7aad ee Xeerka xogta bukaannada. Waad ogaan kartaa xogta jirta ee adiga lagaa hayo.  Waad diidi kartaa in xogtaada la diwaangeliyo, sidoo kalana waad dalban kartaa in la tirtiro xog meesha horay ugu jirtay. Gobalka Skåne ayaa iska leh mas'uuliyadda xogta qofka.*

*Ma rabtaa inaad wax dheeri ah ogaato? La hadal daryeel bixiyahaaga caafimaadka ama bogga 1177.se ka akhriso wax dheeri ah oo ku saabsan diiwaanka tayada ee qaranka*


# Oggolaw wadahadalka caafimaad ee rugtaada caafimaadka

**Caafimaadkaagu waa muhiim. Jimicsi joogto ah, cunto caafimaad leh, sigaar-iyo tubaako ka joogsasho iyo inaad taxaddir u lahaato isticmaalidda khamriga, waxaad ku yarayn kartaa halista cudurrada wadnaha iyo xididdada. Oggolaw wadahadalkaaga caafimaadka.**

## Adigaaga buuxinaya 50ka sano

- Wadahadalka caafimaadku waa lacag la'aan, wuxuuna qiyaastii qaadanayaa hal saac.
- Wadahadalka caafimaadku wuxuu ahaan karaa mid anfac leh iyadoon taas loo eegeyn inaad si buuxda u caafimaad qabto ama aad jirro qabto.
- Inta uu wadahadalku socdo, waxaa lagu siinayaa talo iyo taageero waafaqsan xaaladdaada nololeed. Isbeddello yaryar ayaa sameyn kara farqi weyn.
- Waxaad dooran kartaa inaad wadahadalka caafimaad goobta u timaado ama in fiidiyow laguugula yeesho.

## Sidan ayey wax u dhacayaan

1. Rugtaada caafimaadka ayaa ku soo wacaysa si aad u qabsato waqti kugu habboon. Fadlan gal bogga 1177 si aad u eegto in nambarka taleefankaagu uu sax yahay.
2. Marka aad oggolaato wadahadalka caafimaadka, waxaad farriin qof ahaaneed ku heli doontaa su'aalo ku saabsan caafimaadkaaga marka aad gasho 1177.se.
3. Waxaa rugta caafimaadka lagaaga qaadayaa dhiig baaritaan ugu dambeyn hal usbuuc ka hor wadahadalka caafimaadkaaga.
4. Waxaad wadahadalka caafimaadka la lahaaneysaa hoggaan wadahadal oo tababaran. Inta booqashada lagu guda jiro, waxaa la cabbirayaa cadaadiska dhiigga, miisaanka, dhererka iyo cabbirka dhexda. Waxaad guriga u qaadan doontaa xagal caafimaad oo qof ahaaneed.
5. Adiga naftirkaaga ayaa dooranaya haddii aad rabto talo iyo taageero aad isbeddel ku sameyso.

Adigaaga aqbala wadahadalka caafimaadka waxaad gacan ka geysaneysaa cilmibaaris ku aaddan caafimaadka bulshada adigoo ka qayb qaadanaya mashruuc cilmi baaris. Xog dheeri ah oo ku aaddan mashruuca cilmi-baarista waxaad la heleysaa su'aalaha ku saabsan wadahadalka caafimaadkaaga.

Iskaan-garey nambarka QR-ka ee 1177.se si aad u hesho xog dheeri ah oo ku saabsan wadahadalka caafimaadka.

*Macluumaadkaaga wadahadalka caafimaadka waxaa lagu qorayaa diiwaanka tayada ee gobolka Skåne ee wadahadalka caafimaadka. Sida xogta ku jirta diiwaanka loo isticmaalayo waxaa qoraya fasalka 7aad ee Xeerka xogta bukaannada. Waad ogaan kartaa xogta jirta ee adiga lagaa hayo.  Waad diidi kartaa in xogtaada la diwaangeliyo, sidoo kalana waad dalban kartaa in la tirtiro xog meesha horay ugu jirtay. Gobalka Skåne ayaa iska leh mas'uuliyadda xogta qofka.*

*Ma rabtaa inaad wax dheeri ah ogaato? La hadal daryeel bixiyahaaga caafimaadka ama bogga 1177.se ka akhriso wax dheeri ah oo ku saabsan diiwaanka tayada ee qaranka*